

Kooxda Hawlgalka Tallaalka Gobolkan Waterloo waxa ay ka caawinaysaa da'yarta da'doodu udhaxayso 12 iyo 17 iyo xubnaha qoyska ay la nool yihiin (kuwanoo aan qaadan tallaalkoodii koowaad ee tallaalka COVID-19) inay qaataan tallaalka.

In la siiyo tallaalka da'yarta waa mihiim si ay u yarayso faafitaanka COVID-19 caafimaadkuna uu usii ilaashamo marka lagu noqdo iskuulada.

Yaa qaadan kara tallaalka hadda?

Da'yarta da'doodu u dhaxayso 12 iyo 17 waxa ay hadda [hore isugu sii diiwaan gelin karaan tallaalka COVID-19](#). Da'yarta iyo xubnaha qoyska ay la nool yihiin waxa ay awood uyeelan doonaan inay qabsadaan wakhti kaasoo ay qaadan doonaan tallaalkooda koowaad inta udhaxaya 7da Juunⁿⁱyo 20ka Juunⁿ. **Da'yartu waa inay noqoto 12 jir wakhtiga ay ballanta leeyihiin.** Waxa ay ubadan tahay in da'yartu ay awoodi doonaan inay qaataan tallaalkooda labaad si ka dhakhsiyo badan dadka kale sidaa awgeed waxa ay labadooda tallaalka qaadan doonaan ka hor sannad dugsiyeedka 2021. Wakhtigan, xubnaha qoysku ma qaadan karaan tallaalkooda labaad si dhakhsiyo ah haddii aanay ka mid ah koox kale oo [ahmiyad dheeraad ah leh oo uqalma](#).

Tallaalkee ayaa la siin doonaa?

Health Canada waxa ay u ansixisay tallalka COVID-19 ee Pfizer-BioNTech qofkasta oo dadkiisu tahay 12 jir iyo wixii ka weyn. Eeg caawinaha hoose si aad xog dheeraad ah uhesho.

- [Talaallada COVID-19 ee Da'yarta](#)
- [Waraaqda Xaqaa'iqda ee Tallaalka COVID-19 Da'yarta iyo Caruurta](#)
- [Su'aalaha Inta Badan Layska Weydiiyo Tallaalka Covid-19](#)

Sidee ayaa aad hore isugu diiwaan gelinaysaa?

Halkan dhag kasii si aad [hore isugu diiwaan geliso tallaalka COVID-19](#)

- Fadlan dooro “**da'yarta 12 -17 jir**” inay yihiin koox ahmiyad dheeraad ah lasiinayo
- Ku buuxi foomka xogta shakhsiga ah ee da'yarta, xubnaha qoysku iyagu uma baahna inay buuxiyaan foomka.
- Marka da'yartu uu helo koodhka ballan qabsiga, xubnaha qoysku ee isla guriga kula nooli waxa ay isticmaali karaan isla koodhka ballanta si uu u qabsado wakhti kaasoo uu ku qaadanaayo tallaalkiisa koowaad.

Haddii aad ubaahan tahay caawimo si aad u buuxiso foomka, fadlan [daawo fiidiyawa ku saabsan sida loo buuxinayo foomka](#), ama weydii qof aad ku kalsoon tahay inuu ku caawiyo. Haddii aad u baahan tahay taageero dheeraad ah wac 519-575-4400, taageeradu waxa ay kuugu diyaar tahay in ka badan 200 oo luuqadood. Dhaga la' ama ay ku adagtahay inuu wax maqlo (TTY): 519-575-4608.

Waxa aad uheli doonta koodhka ballanta qaabka aad u codsatay markii aad buuxisay foomka. Fadlan u eeg qaybta JUNK/SPAM ee iimaylkaaga si joogta ah.

Marka aad hesho koodhkaaga ballanta, fadlan uqabso wakhtigaaga sida ugu dhakhsiyaha badan ee aad awoodo. Haddii xubnaha qoysku ay hore isula sii diiwaan geliyeen Caafimaadka Dadweynaha ee Gobolka Waterloo, waxa ay ku samaysan karaan ballan iyagoo isticmaalaya isla koodhkii ballan ee ay da'yartoodu heshay waxayna baabiinayaan koodh ballaneed oo kasta oo kale oo ay heleen.

Halkee ayaa ay da'yartu ka qaadan kartaa tallaalka?

Da'yartu waxa ay u baahan yihiin inay ka qabsadaan wakhti xarun bukaan socod tanoo bixinaysa tallaalka Pfizer. Fadlan dooro mid ka mid ah xarumaha soo socda marka aad qabsanayso ballan:

- Cambridge Pinebush, Cambridge
- Health Sciences Campus, Kitchener
- The Boardwalk, Waterloo
- Wellesley Clinic, Wellesley
- New Vision FHT, Kitchener

Booqo [Khariidada Xarumaha Tallaalka COVID-19](#) si aad u aragto meelaha ay ku yaalaan xarumuhu.

Da'yartu waa inay usoo qaataan kaadhka caafimaadka maalinta ballantooda. Haddii aanay sidan kaadhka caafimaadka, fadlan soo aqoonsi kale oo xaqiijinaya cidda ay yihiin oo markaasina leh nambar/koodh. Si aad wax dheeri ah uga ogaato waxa ay tahay inaad samayso ka hor iyo ka dib ballantaada booqo bogga [Xarumaha Tallaalka COVID-19 ee Gobolka Waterloo](#).

[insert name of Board or school] waxa ay ku dhiirri gelinaysaa dhammaan dadka u qalma inay [hore isu sii diiwaan geliyaan si ay uhelaan tallaalkooda](#). Marka ay macquulka noqoto, iyo si aad sida ugu wacan ilmahaaga uga taageerto waxbarashadooda, fadlan ilaali saacadaha iskuulka. Si kastaba ha ahaatee, haddii aad kaliya awoodo inaad samaysato ballan inta lagu gudo jiro wakhtiga iskuulka, fadlan sidaasi samee. Tani waa fursad mihiim ah oo ahmiyad lagu siinayo caafimaad dhammaan dadka bulshadeena.

Waad ku mahadsantahay taageeradaada aad sii wado si aad ugu ulaaliso bulshadeena amni.

Mahadsanid,

[qofka leh awooda saxeex ee iskuulka]